



NATIONAL  
IMMIGRANT  
JUSTICE CENTER  
A HEARTLAND ALLIANCE PROGRAM

# IMMIGRATION AND YOU.

KNOW YOUR  
RIGHTS

2013 MANUAL FOR CHILDREN



# NATIONAL IMMIGRANT JUSTICE CENTER

Xarunta Cadaalada Muhaajiriinta Qaranka ee Gaashaanbuurta la ah Heartland (NIJC), waxay kor u qaadaa xuquuqaha bini'adama iyo helitaanka xaquuq cadaalada ay mudan yihiin muhaajiriinta, qaxootiga, iyo magangelyo-doonka iyadoo u mareysa adeegyada sharciga, nidaam wax ka bedelid ah, raadna ku reebeyса dacwada maxkamada iyo waxbarashada bulshada.

## NATIONAL IMMIGRANT JUSTICE CENTER

A HEARTLAND ALLIANCE PROGRAM

National Immigrant Justice Center  
208 South LaSalle Street, Suite 1818  
Chicago, IL 60604  
Teleefan: (312) 660-1370  
Faakis: (312) 660-1506  
[www.immigrantjustice.org](http://www.immigrantjustice.org)

Fadlan Xasuuso: Buug-yarahsan waxaa loogu talogalay inuu keliya kaafiyo horudhaca tilmaanaha inuu caruurta baro waxyaabo ku saabsan nidaamka laanta socdaalka ee dalka Mareykanka. Kama hadleyso aragtida oo idil ee ay leedahay laanta socdaalka howlaheeda iyo dacwadaha maxkamada. Ilaha kale waa in lagala tashadaa tilmaame kasta ay leedahay ama su'aalo dheeri ah oo ku saleysan sharciga iyo qaynuunka hadda jira. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan la xiriir NIJC ama qareenka laanta socdaalka.

Buugyaraaha waxaa asal ahaan la daabacay sannadkii 2004. Qoraalkan la casriyeeyey waxaa diyaariyey shaqaalaha ku sugan Xarunta Cadaalada Muhaajiriinta Qaranka.

## JADWALKA TUSMADA

Erayada aad u baahan tahay inaad ogaato .....	4
Maxaan aniga xaruntan u jooga?.....	7
Maxay kala yihiin noocyada xarumaha la isku xabiso? .....	8
Maxay yihiin xaquuqaha aan ku leeyahay xarunta la isku xabiso?.....	9
Xariga ma la iiga siideyn kara xabsiga si aan ula joogo qof ka mid aha qoyska? .....	10
Maxaa ku dhacaya kiiskeyga markii la iiga sii daayo xabsiga oo la ii sii daayo qoyskeyga ama daryeelka soo korsadaha? .....	12
Qareenku muxuu yahay ee sidee buu keygana ii caawin doonaa?.....	14
Maxaan qareenkeyga ka filan kara? .....	15
Sidee baan dalka Mareykanka si sharci ah ugu joogi karaa?.....	16
Maxa dhacaya hadduu xaakimku yidhaahdo in aan joogi karin dalka Mareykanka? .....	18
Waxyaabo muhiim ah in la xusuusnaado.....	20
Sida loogu raro kiiskaaga Laanta socdaal maxkamad kale .....	21
Bedel foomka saambalka ee meesha .....	22
Adeeg sharci bixiyasha laanta socdaalka oo bilaash ama raqiis ah .....	23

## **ERAYADA AAD RABTO INAAD GARATO**



### **LAMBARKA A :**

Saraakiisha laanta socdaalka waxay ku siin doonaan lambar oo ay saraakiisha laanta socdaalka iyo xaakimka laanta socdaalka ay u isticmaali doonaan inay kugu aqoonsadaan. Lambarkan waxaad ka heli kartaa dukumintiyadaada laanta socdaalka. Waxay leedahay sagaal tiro lambar oo ka bilaabaneysa xarafka "A"

### **MAGANGELYADA :**

Magangelyadu waa badbaado la siiyo dad aan ku amaan qabin dalkooda sababo la xiriira jinsi, xubin ahaanshaha koox bulsho gaar ah, fikir siyaasadeed, jinsiyad ama diin. Haddi magangelyo lagu siiyo, waxaad si sharci ah ku joogi kartaa dalka Mareykanka.

### **QAREENKA (SHARCI-YAQAAANKA) :**

Qofka adiga ku matalaya xaakinka hortiisa iyo saraakiisha dawlada. Qareenkaaga wuxuu kuu sheegi doonaa haddii aad u qalanto faa'lido kasta oo hoos imaaneysa shuruucda laanta socdaalka ee Maraykanka wuxuuna kaaga jawaabi doonaa su'aalahaaga ku saabsan sharciga iyo xuquuqdaada aad dalka Mareykanka ku leedahay. Qareenkaaga adiga ayuu kuu shaqeynaya wuxuna kaa caawinaya inta aad maxkamada joogto iyo saraakiisha laanta socdaalka. Macluumaadka aad la qeybsato shariyaqaankaaga waa sir sharci-yaqaaankuna lama qeybsan karo dad kale ilaa aad adiga ka ogolaato macluumadkaas.

### **U DOODISTA BADBAADINTA CARRUURTA :**

Qofka loo qoondeyn karo inuu caawiyo dadka oo idil ee kaala shaqeynaya inaad fahanto waxa ay danahaagu yihiin. U dooduhu ma aha qareenkaaga (shariyaqaan). Macluumaadka aad u sheegeyso udoodahaaga wuxuu noqon karaa mi sir ah.

### **SIRTA :**

Sir macnaheedu waa qarsoodi ama qaas. Qareenk waa inuu xifdiyaa macluumaadka badankooda ee sirta ah ilaa aad adiga ka ogolaato inuu la qeybsado dadka kale mooyaane.

#### **WAAXDA AMNIGA GUDAHAD (DHS) :**

Saraakiisha laanta socdaalka iyo qareenada dawlada ee ku sugaran maxkamada waxay u shaqeeyaa DHS. DHS waxay leedahay laamo kala duwan. Laanta wakiilka ka ah saraakiisha laanta socdaalka iyo dawladaba ee maxkamada ku sugaran waa laanta socdaalka & dhaqangelinta meelaha cashuurta la isaga qaado ee alaabta dalka soo galeysa ama ka bexeysa. (ICE).

#### **XAFIISKA DIB U DEJINTA QAXOOTIGA (ORR) :**

Qeyb ka mid ah dawlada federaaliga ayaa masuul kaa ah inta aad xirantahay ama daryeel korinta federaaliga waxayna go'aan ka gaareysaa in laguugu sii daayo xubnahaaga qoyska ee Mareykanka jooga. Qeybtan dawlada ka mid ah waa ay ka baxsantahay DHS/ICE iyo maxkamada laanta socdaalka.

#### **MASAAFURIN (TARXIIL) :**

Markuu go'aamo xaakimka laanta socdaalka inaad wadankaaga ku laabanayo. xaakimka waxa uu gudagalayaa amarkiisa ee adiga ka dhanka ah ee tarxiilida. Markii lagu masaafuriyo, waxaa laguugu celinayaa wadankaaga mana laguu ogolaanayo in laguu fasaxo inaad ku laabato dalka Mareykanka mudo tobant sano ah, ilaa aad ka hesho saamaxaad gaar ah.

#### **XIRMADA DIB U MIDEYNTA QOYS (FRP) :**

Dukumintiga loo diro qaraabadaada ee Mareykanka joogta haddii ay doonayaan inaad ayag la joogto inta uu xaakimka go'aan ka gaarin kiiskaaga.

Qaraabadaadu waa inay awoodi karaan inay tusiyaan inaad adiga kaa faalaqaadi karaan inta aad joogto dalka Mareykanka.

#### **QOYNSKA ILMAGA AYSAN DHALIN KORIYA:**

Qoyska ilmaha aysan dhalin koriya waa qoys ay dawlada Mareykanka ay ansixisay inay daryeelaan carruurta muhaajiriinta ee aan haysan wax qaraabo ah oo ku xanaaneeyaa dalka Mareykanka. Dawladu waxay go'aamisaa hadduu ilmuhi lagu sii deyn karo qoyska ilmaha dhulin koriya. Intii aad la nooshahay qoyska ilmaha dhulin koriya, kiiskaaga laanta socdaalka wuu soconaya. Ma awoodi doontid inaad si joogto ah ula joogto qoyska ilmaha dhulin koriya.

#### **MAXKAMADA LAANTA SOCDAALKA:**

Kiisaska laanta socdaalka yaala waxaa go'aan ka gaaraya maxkamada laanta socdaalka. Magaaloooyin badan oo kala duwan oo ku yaala dalka Mareykanka ayaa waxay leeyihiin maxkamadaha laanta socdaalka. Maxkamadaha laanta socdaalka qeyb kama ah DHS/ICE.

#### **XAAKIMKA LAANTA SOCDAALKA :**

Kani waa qofka ka go'aan gaaraya kiiskaaga laanta socdaalka. Xaakimku waxa uu dhegeysanayaa waxa adiga iyo qareenkaaga aad dheheysaan ama aad soo bandhigtaan waxaa kale oo uu dhegeysanayaa waxa qareenka DHS/ICE uu ka odhanayo sababta aadan ama aad u joogi karto dalka Mareykanka.

#### **DEGENAANSHAHA JOOGTADA EE SHARCIGA AH.**

Degenanshaha joogtada ee sharciga ah waxaa la siiyaa qof ka yimid meel ka baxsan dalka Mareykanka oo fasax loo siiyey inuu si joogto ah ugu nagaado.

**CARRUURTA:**

Waa qof ka yar 18 sano jir.

**OGEYSIISKA MAXKAMAD SOO TAAGISTA:**

Ogeysiiska maxkamad soo hor-istaagistu waa dukuminti ka soo baxay dawlada Mareykanka oo sharaxaya sababta ay dawlada ay u rabto inay ku masaafuriso.

**HEERKA DHALINYARADA****MUHAAJIRIINTA QAASKA AH (SIJS) :**

SIJS waa nooc badbaadinta carruurta ee laanta socdaalka ee lagu xadgudbay, la deyriyey, ama ay dayaceen waalidiintooda ama ilaaliyahooda. Carruurta waalidkooda dhintay waxay sidoo kale xaq u leeyihiiin badbaadadan.

**QUMANAANTA QIIMEYNTA:**

Markay qaraabodu warsadaan ORR, hay'adaha dawlada ee haya carruurta, waxayna carruurtaasi ku si deysaa xanaanadooda, ORR waxay mararka qaarkooda guriga u dirtaa qof kamid qaraabada si uu u hubiyo in gurigu u tahay meel badbaadooo qaraabaduna awoodaan inay xanaaneeyaan carruurta.

**DAL-KU-GALKA U:**

Nooca badbaadinta laanta socdaalka waxay u ogolaaneysaa in shaqsiga dhibanaha ah ay dembi ku tahay inuu si sharci doro ah ku joogo dalka si sharci doro ah ku joogo dalka Mareykanka. Si aad ugu qalanto, bukaanku waa inuu u soo sheegaa denbiga booliska uuna kala shaqeeyaa denbi baarista ama dacwada denbiga.

**DAL-KU-GALKA T:**

Nooca badbaadinta laanta socdaalka ee dhibaanada sida suuqmadowga dad gudbinta. Dhibanaha suuqmadowga dadgudbinta waa qof sameeyo inuu dad keeno dalka Mareykanka lagu qasbo inay ku shaqeeyaan ama fal lid ku ah dalka Mareykanka balse ma aha muwaadin Mareykan ah. Dukumintiga muujinaya in fasaxan la siiyey ayaa inta badan waxaa loogu yeeraa kaadhka cagaaran rabitaankooda inta ay joogaan dalka Mareykanka.

**AAN RASMI AHEYN:**

Qofka aan rasmiga aheyn waa qof jooga dalka Mareykanka isagoon fasax ka heysan dawlada Mareykanka.

**TEGIS IKHTIYAARI AH:**

Xaakimku waxa uu kuu ogolaan karaa inaad dalka Mareykanka isaga tagto ikhtiyaarigaaga, iyadoon amar la soo saarin oo masaafuris. Haddaad u tagto si ikhtiyaari ah, waxad mustaqbalka awodi kartaa inaad si sharci ah ugu soo laabato dalka Mareykanka, waa haddii aad u qalanto dal-ku-galka.

**OGOLAANSHO SHAQADA:**

Saraakiisha laanta socdaalka waxay mararka qaarkood u ogolaadaan muhaajiriinta intey joogaan dalka Mareykanka. Fasaxan waxaa loogu yeeraa ogolaansho shaqo. Markii ay dawlada Mareykanka u ogolaato muhaajiriitna inay shaqeystaan, dawlada waxay qofka siinaysaa kaadh, loogu yeedho Dukumintiga Shaqo u ogolaanshaha (EAD).



## **MAXAAN ANIGU UGU SUGANAHAY XARUNTAN?**

Meesha aad hadda ku sugan tahay waa xarunta lagu xiro dadka da'dooda ka hooseysa ee laanta socdaalka. Halkan baad ku suagan tahay waayo Dawlada Mareykanka waxay aaminsan tahay inaadan fasax u heysan inaad joogto dalka Mareykanka. Inaad joogto dalka Mareykanka, xaakimka laanta socdaalka ama saraakiisha laanta socdaalka waa inay go'aan ka gaaraan inaad haysato sabab sharci ah oo aad ku joogto. Qareenkaaga wuxuu kaa caawin karaa inaad la hadasho xaakimka ama saraakiisha. Waxay qaadan kartaa billooyin badan kahor intaadan helin go'aanka kasoo xaakimka.

## **MIYAAN JOOGI KARAA DALKA MAREYKANKA?**

Xaakimka laanta socdaalka ama saraakisha laanta socdaalka keliya ayaa go'aan ka gaari kara haddii aad si sharci ah u joogi karto dalka Mareykanka, ama haddii aad dalkaaga ku laabanayso. Fadlan dulqaado intey hannaanka laanta socdaalka ay qaadanayso oo mudo dheer. Xitaa haddii aad horey u ogeyd waxa aad rabtay inaad ogaato, weli waad sii xirnaan kartaa billooyin badan. Mudada dhabta ah ay qaadanayso waxay hadba ku xirnaan doontaa waxyaabo badan oo soo baxa, oo ay isugu jiraan hadba sidey dawlada u wado howlaha waraaqahaaga, iyo nooca kiista aad haysato.



# **MAXAY KALA YIHIIN NOOCYADA XARUMAHA LA ISKU XIRO?**



## **• XARUMAHA GABAADKA:**

Meelahan ah xarumaha la isku xiro waxay leeyihii heerka amniga oo hooseeya, iyo heerka xoriyada ay sarreeya. Carruurta ku nool gabaadka xarunta waxay si joogto ah u booqanayaan jiimka, xorna u yihiin inay daawadaan teleefishinka, cayaaraan cayaaraha fiidiyowga, oo ayna akhristaan. NIJC waxay caadi ahaan si isbuucle ah booqasho ugu sameeyaan Xarunta Caalamiga ee Carruurta (ICC) Xarunta Caalamiga ee Caruurta Beverly (ICCB) waxaad kaloo ka heli kartaa teleefanka maalmaha Arbacada inta u dhexeysa 2-4 galabnimo.

## **• XARUMAHA BADBAADADA-SHAQAALAH:**

Xarumahan la isku xiro heerkooda amniga waa ay ka sareeyaan marka loo eego xarumaha gabaadka. Carruurta ku nool xarunta badbaadada-shaqaalaha waxay helayaan mudnaan gaar ah ay ku aadaan jiimka ama ay ku cayaaraan fiidiyowga cayaaraha, inkastoo ay weli haystaan xuquuq ay ku helayaan madadaalo maalintiiba. Inkastoo carruurta ku sugar xarumaha badbaadada-shaqaalaha mararka qaarkood lagu xiro denbiyo yaryar, inta badan waxay qabaan dhibaatooyin habdhaqan ah halkii ay ka ahaan laheyd arimaha denbiga. Xarunta Dhalinyarada Caalamiga (IYC) waa tusaalaha xarunta badbaadaba-shaqaalaha. NIJC waxay caadi ahaan si isbuucle ah booqasho ugu sameeyaan IYC, waxaadna heli kartaa teleefanka.

## **• XARUMAHA BADBAADADA-SHAQALAH EE DABIIBKA:**

Xarumahan la isku xiro waxay leeyihii heerar sarreeya oo kormeiris ah iyadoo la siinayo shaqaale lagu soo kordhiyey shaqaale lala bardardhigay caruurta. Xaruntan waxaa laga heli karraa carruur baahi gaar ah u qabta xaadal caafmaad gaar ah ama mid cilmi-nafsi ah. Dhalinyarada Muhaajiriinta ee Daryeelka ku Xeeldheer (SCIY) waxay tusaale u yihiin xarunta la isku xiro ee badbaadada-shaqaalaha dabiibida. NIJC waxay caadi ahaan booqasho ku sameysaa SCIY isbuuc dhaaf, waxaadna ka heli kartaa teleefanka.

## **• XARUMAHA BADBAADADA:**

Xarumahan la isku xiro waxay leeyihii amni aad u sarreeya, iyo xoriyad heerkeedu yar tahay. Intabaden albaabada idilkood oo kuyaala xarunta badbaada waa ay wada xiran yihiin. Badankooda carruurta ku sugar xarumaha amniga waxay ku lug lahaayeen nidaamka cadaalada dhalinyarada ama nidaam denbiyedka. Chicago agagaaraheeda ma laha xarumo badbaado.

## **MA U GUURI KARAA XARUN KA DUWAN?**

Sida qaalibka ah, shaqaalaha ku sugar meelaha la isku xiro si wadajir ah ayaa waxay uga wada shaqeeyaan ORR inay carruurta xarun ka raraan una raraan meel kale. Inta badan tani waxay sabab u tahay habdhaqanka carruurta. Habdhaqan wanaaga waxay kaa caawin kartaa in laguu geeyo xarun la isku xiro oo ilaalo hooseeyo (oo xoriyad badan leh). Si kale, habdhaqan xumida waxay kaa caawin kartaa hoos lagu geeyo xarun la isku xiro oo ilaalo sarreeyo (oo ka xoriyad yar).

## **MAXAY YIHIIN XUQUUQAH AAN KU LEEYAHAY XARUNTA LA ISKU XIRO?**

INKASTOO AAD XIRAN TAHAY, WELI XAQ BAAD LEEDAHAY:

### **WAA MAXAY XUQUUQDEYDA AAN KU LEEYAHAY DARYEELKA AASAASIGA AH?**

- Waxaad xaq u leedahay baahidaada guri habboon (cunto, gogol-jiif, dhar nadiif ah, inaad hesho saabuun, daawada ilkaha, iyo badeecoojin kale).
- Waxaad xaq u leedahay inaad aragto dhakhtar haddaad u baahato daryeel caafimaad.  
\*\*Haddaad xanuun dareemeyso, durbadiiba u sheeg kiiskaaga-qofka-kushaqa-leh.\*\*
- Waxad xaq u leedahay daryeel ilkaha oo degdeg ah.
- Waxaad fursad u heli doontaa inaad la hadasho qoyskaaga kafiilada iman kara isbuuc kasta. Waxaad wici kartaa qoyskaaga ku sugar dalka Mareykanka ama dibada.
- Waxaad xaq u leedahay madadaalo iyo howl-qabad jirka la xiriira, oo isugu jira waqtii banaanka aad u baxdo markay cimilada ay kuu ogolaato.
- Waxaad xaq u leedahay inaad hesho gelida adeegyada diimeed ee dooqaaga ah mar waliba oo suurogal. ah



### **BAL KA WARAN WICITAANKA QAREENKEYGA AMA DHAKHTARKEYGA?**

- Waxaad xaq u leedahayinaad wacdo qareenkaaga ama dhakhtarkaaga.
- Waxaad xaq u leedahay inad si gaar ah ula hadasho qareenkaaga ama dhakhtarkaaga. Qareenada NIJC waxay leeyihiin saacado ay xafiiska joogaan marka aad weceyso. Warso qofka-kiiskaaga-ku-shaqa-leh haddaad u baahato inaad la hadasho qareenkaaga.

### **MAXAA DHACAYA HADDAAN GAARO 18 ANIGOO KU NOOL XARUNTA?**

- Kadib markaad 18 gaarto, saraakiisha DHS/ICE waxay kaa rarayaan xarunta lagu xiro currurta waxayna ku geynayaan xarunta la isku xiro ee dadka waaweyn. Adiga iyo qareenkaaga waa inaad isku daydaan inaad sameysaan diyaargarowgaaga aad uga tegeyso xarunta kahor intaadan gaarinta maalinta sannadguurada dhalashadaada 18aad.

## **MA LA IIGA SII DEYN KARAA XARIGA SI AAN ULA JOOGO XUBIN QOYSKEYGA KA MID AH?**

Carruur badan ayaa laga sii daayaa xariga si ay ula noolaadaan qoysaskooda. Intaad xariga ku jirto, Xafiiska Dib-u-dejinta Qaxootiga (ORR) wuxuu ku shaqo leeyahay daryeelistaaada. ORR waa inay go'aan ka gaaraan hadey amaan kuu tahay in laguugu sii daayo qoyskaaga. Waxay u baahan yihii inay hubiyaan qofka aad rabto inaad la noolaato inuu yahay qof xilkas oo amaan ah, oo aan halis galeyn inta aad la nooshahay xubnahaaga qoyska. Haddaadan dalka Mareykanka ku laheyn qoys, waxaad awoodi kartaa inaad la noolaato saaxiibka qoyska.

## **XUBNAHA QOYSKEYGA WAA KUWO AAN RASMI AHEYN. WELI MALA II SII DEYN KARAA?**

Waxaa laguugu sii deyn KARAA xubnaha qoyska ee aan heysan fasax ay ku joogaan dalka Mareykanka (isaga ama iyadu ma laha dukuminti/rasmi ma'aha). Si kastaba ha'ahaatee, xubnaha qoyskaaga waa in farihiisa/heeda ay dawlada ka baartaa, waxay halis ku noqon kartaa xubnaha qoyskaaga: 1 hadii xubnaha qoyskaaga horey loo masaafuriyey ama ay dhib ka jiraana xaga dawlada, iyo/ama 2 haddii xubnaha qoyskaaga hadey u jarun tahay waraaq lagu soo xirayo, amaba uu galay denbiyo halis ah. Waxay kaloo halis ka jirtaa dhanka safarka markuu qof aan dukuminti laheyn, sida xubin qoyskaaga ka mid ah, lagu xiro xarunta la isku xiro ee rabay inuu guriga ku geeyo. Kala hadalu qofka-ku-shaqa-leh-kiiskaaga haddaад wax su'aal qabto.



## BAL KA WARAN HADDAANBA LAHEYNA QOYS? WELI MA LA IIGA SII DEYN KARAA XARIGA?

Waxaad awoodi kartaa in lagu sii daayo iyadoo ay ku xiran tahay da'daada, halka laguugu xiray, iyo haddaad u qalanto dal-ku-gal. Carruurta qaar ee u qalanta sixid sharci ah ayaa waxay xaq u leeyihiiin in xariga laga sii daayo oo loo gudbiyo xanaanada ilmaha aan qofka dhalin koriya. Xanaanada qofka ilmaha uusan dhalin koriya waa markii aad awoodo inaad la noolaato qoyska ee ay dawladu ay horey u ansixisay. Wuxaan kiiskaaga laanta socdaalka ku dhameyn kartaa inta aad la nooshahay qoyska ku soo korsaday. Magaaloojin badan ayaa waxaa ka jira qoysas ilmo aysan dhalin koriya ee dalka Mareykanka. Qareenkaaga waxa uu codsan karaa in laguu geeyo qoys qeyb Mareykanka ah balse go'aanka waxaa iskaleh halka lagu geynayo. Haddii laguugu sii daayo xanaanada qof ilmo uusan dhalin koriya, waxaa laguugu xiriirinayaqareen cusub oo si iskuduubni ah ula shaqeeya gurigaaga cusub.

## ILAA IYO INTEE AYEE IGU QAADANEYSAA INTA KAHOR INTA AAN LA II SIIDEYN?



**WAXYAABO BADAN OO SOO BAXA AYAA  
SAAMEYN DOONA  
SIDEED UGU DHAQSIYAH AYAA  
LAGUU SII DEYN KARAA?**

- hadba inta xarunta aad ku xirantahay ay u amaan yartahay ayaa ah, sida ugu dhaqsiyaha badan ee lagu sii deyn karo.
- Waxay inta badan qaadataa ugu yaraan lix ilaa sideed isbuuc oo laguugu sii daayo qoyskaaga, balse waqtiyeenta waxay ku xiran tahay waxy yaabo badan oo soo baxa, oo isugu jira sida ugu dhaqsiyaha badan uu qoyskaaga uu u awoodi karo inuu soo dhammeystiro tallaaboojinka lagama maarmaanka u ah dib-u-mideynta qoyska.
- Carruurta qaar qoysaskooda waa inay maraan u kuurgalid ku habboon oo go'aan looga gaarayo hadey amaan kuu tahay inuu ku noolaado gurigaasi iyo qoyskaasi. Hanaanka waxay inta badan qaadataa saddex bilood hadey ugu badato.
- Haddii aad haysato xukun dhalinyaro ama xukum denbiyeed laguugu xukumay, ganaax aan weli go'aan laga gaarin, ama dacwadooyinka laguu jaray, deysmadaada way daheysaa.
- Qareenkaaga ma xakameyn karo deysmadaada ee uu kaa soo deynayo xarunta aad ku xirantahay.
- Warso qofka kiss kaaga-ku-shaquo-leh haddii aad leedadahay wax su'aal ah oo ku saabsan kasii deysmadaada xarunta aad ku xirantahay.



## **MAXAA KU DHACAYA KIISKEYGA MARKII LA IIGA SII DAAYO XARIGA OO LA II DIRO QOYSKEYGA AMA XANAANADA QOFKA AAN I DHALIN BALSE I SOO KORSADAY?**

\*\*KA SII DEYNTA XARIGA MICNAHEEDA MA'AHA KIISKAAGA LAANTA SOCDAALKA WUU DHAMMAADAY!\*\*

Mar haddii lagu sii daayo, kiiskaaga waxaa loo sii gudbinayaa maxkamada laanta socdaalka oo aad ugu dhow gurigaaga cusub. Mar haddii lagu sii daayo, maxkamada laanta socdaalka cusub waxay cinwaankaaga cusub kugu soo diri doontaa waraaq oo ku saabsan maclummaadka ku saabsan maxkamadaada cusub iyo goobta ay ku taalo.

Haddii lagu sii daayo ka hor xaakimka oo kiiskaaga go'aan kama dambeys ah ka gaarin, fasax uma haysatid inaad si joogto ah ku joogto dalka Mareykanka. Xaakimka laanta socdaalka ama saraakiisha laanta socdaalka waa inay go'aan ka gaaraan haddii aad sii joogi karto dalka Mareykanka kadib markii uu isagu ama iyadu uu/ay barato/aro kiiskaaga.

### **MIYAAN U BAAHANAHAY QAREEN? SIDEED BAAN MID KU HELI KARAA?**

Waa inaad isku daydaa inaad hesho qareen ku matala marka lagaa sii daayo xariga. Kadib markii lagu siidaayo, NIJC waraaq bay kuu soo diri doontaa oo ay ku taxan yihiin diiwaanka qareenada laga helo agagaarahaaga. Waxaa kaloo jira diiwaan qareen bilaash ama qiimihiisa yar yihiin ee dhamaadka buugyarahen. Qareenku waxa uu kaa caawinayaa inaad fahanto waxa ka dhacay maxkamada laanta socdaalka iyo kiiskaaga. Haddii aad u qalanto in fasax sharci ah lagu siiyo inaad ku joogto dalka Mareykanka, qareenka wuxuu kaa caawin karaa inuu xaakimka u sharaxo kiiskaaga.

Ma lagaaga baahna inaad lahaato qareen. Haddii aadan heli karin qareen, waxaad tegi kartaa maxkamada oo waxaa warsan kartaa xaakimka inuu waqtii dheeri kuu siiyo si aad u hesho qareen. Xaakimiinta qaarkood waxay ku siinayaan waqtii inaad hesho qareen. Waa inaad ka soo qeybgashaa dhegeysigaaga maxkamadeed xitaa haddii aadan haysan qareen ama hadii kale xaakim waxa uu amrayaa in lagu masafuriyo.



## XUSUUSNOW INAAD :

- Had iyo jeer tagto balamaha maxkamada: Maxkamadu waa ay ku masaafurinaysaa hadaad goyso. Inaad barato taariikhda maxkamada leedahay, waxaad wici kartaa 1-800-898-7180 oo aadna gelisaa lambarkaaga. Wuxuu lambarkan ka heli kartaa waraaqaha lanta socdaalka ee aad haysato, ama waxaad kaloo ka heli kartaa warqada NIJC ay kuu soo diri doonto kadib markii lagu sii daayey.
- Had iyo jeer u sheegtaa dawlada halka aad ku nooshahay: Haddaad u guurto cinwaan cusub, waa inaad xaakimka lanta socdaalka ama saraakiisha laanta socdaalka war gelisaa si darteed waxay kuu soo diri karaan ogeysiisaya ku saabsan balamahaaga xiga ee maxkamada. Si aad tani u sameyso, waa inaad fayl gelisaa EOIR-33, oo weli laga heli karo [www.usdoj.gov/eoir](http://www.usdoj.gov/eoir), iyadoo ay la jirto maxkamada laanta socdaalka iyo mid DHS/ICE.
- Siideyntaada xariga lagaa sii daayoxaq kuuma siinayso inaad shaqeyso: Haddii aad hadda rabto inaad shaqeyso oo laguu soo daayo, waa inaad ka hubsataa qareenkaaga.
- Waxad xaq u leedahay inaad iskuul dhigato: Waa inaad iskuul dhigataa. U sheeg qareenkaaga haddii aad wax dhibaato ah aad ku qabto iska qorista iskuulka.
- Wuxaa xaq u leedahay inaad ahaato qof badbaadsan oo caafimaad qaba markii aad la joogto xubnahaaga qoyskaaga: Haddii xubnaha qoyskaaga ay kuu geysanayaan dhaawac ama ay kugu qasbayaaninaad sameyso wax aadan ku fikirin oo waajib lagaaga dhigo inaad samayso, waa inaa wacdaa booliska oo xitaa waa inaad u sheegtaa qareenkaaga. Xaaladaha gurmadka degdega, waa inaad booliska ka wacdaa adigoo garaacaya 911.
- Waa inaad banaanka ka joogtaa dhibaatada: Had iyo jeer waxaad xusuusataa in xaakimka laanta socdaalka uusan kiiskaaga weli go'aan ka gaarin. Haddii aad iskuulka dhibaato ugu jirto ama booliska dhib ku qabto, waxay saameyn kartaa go'aanka xaakimka oo ah inaad joogi karto dalka Mareykanka iyo in kale.



## **QAREENKU MUXUU YAHAY? SIDEE BUU KEYGA II CAAWIN KARAA?**

"Qareen" waa eray kale oo u taagan sharci-yaqaan. Shaqada qareenkaaga waa inuu kaa gala taliyo kiiskaaga laanta socdaalka, iyo haddii aad u qalantana, inuu kaa caawiyoo inaad dalbato gargaarka laanta socdaalka oo kuu ogolaan kara inaad joogto dalka Mareykanka. Qareenadu xitaa waxay ka caawiyaan dadka ee raba inay ku laabtaan dalalkooda. Qareenkaaga adiga ayuu kuu shaqeeyaa. Isaga ama iyada uma shaqeeyaan dawlada. Waa muhiim inaad hesho qareen oo u tababaran sharciga laanta socdaalka.

Marka ugu horreysa ee aad la kulanto qareenkaaga, isaga ama iyada waxay ku weydiin doonaan su'aalo badan waxayna wax kaa weydiin doonaan waxa aad rabto inaad sameyso. Qareenkaaga waxa uu ku weydiin karaa su'aalo aad shaqsiyeed u ah oo adag. Isaga ama iyada cidkale ulama qeybsan karaan waxa aad u sheegtay, ilaa aad fasax ka siiso inuu sidaa sameeyo mooyaane. Waxaa muhiim ah inaad u sheegto qareenkaaga waxkasta ee aad awoodo ee ku saabsan tagtadaada, sida aad dalkan ku soo gashay, iyo sababta aad halkan u timaaday. Haddii qareenkaaga aadan run u sheegin, isaga ama iyada ma woodi karaan inay ku caawiyaan. Qareenkaaga inta badan uu kaa garanaayo, ayuu si fiican ku caawin karaa.

Ka dib markaad qareenkaaga la kulanto, isaga ama iyada waa inuu kaa caawinayaan inaad fahanto sulashooyinkaaga sharciyadeed, wuxuuna kaa caawinayaan inaad qaadato go'aanka ugu muhiimsan kan kuu ah. Qareenkaaga waa inuu kaala taliyaa sharciga laanta socdaalka. Had iyo jeer suurtogal uma aha qarrenkaaga inuu kuu helo waxa aad doonayso. Haddii aadan ku qanacsaneen qareenkaaga, waxaad xaq u leedahay inaad raadsato qareen kale oo ka duwan. Si kastaba ha'ahaatee, waxaad bedelanaysaa qareenadaada, waxaa muhiim kuu ah inaad u sheegtaa qareenkaaga hore inaadan dooneyn isaga ama iyada inay ku caawiyaan.

## **MAXAAN KA FILANAYAA QAREENKEYGA?**

QAREENKAAGA WAA INUU:

- Si taxadar leh kuu dhegeystaa
- Kuula dhaqmaa si saaxiibtinimo oo xushmo leh.
- Isticmaalaa turjumaan hadduu uu/ay isagu/iyadu ku hadlin afkaaga kuugu fiican.
- Sharaxaa waxyaabaha aad jeceshahay oo dhan, ka hor iyo ka dib intii lagu jiro maxkamada horteeda.
- Sharaxaa su'aalaha uu xaakimku ku weydiin karo
- Kuu sheegaa isagoo kuugu celcelinaya kiiskaaga
- Kaaga jawaabaa su'aalahaaga oo idil.
- U soo jawaab celiyaa wicitaankaaga teleefanka sida ugu dhaqsiyaha badan
- Hubiyaa guulaha laga gaaray kiiskaaga ee saraakiisha iyo maxkamada laanta socdaalka ay hayaan
- Kuu sameeyaa balamo isku xigxiga
- Kuu sharaxaa dukuminti kasta kahor intaadan sixiixin
- Kuu sharaxaa inta lacag ah ee uu isagu ama iyadu uu/ay kaa qaadanayo/so inta aadan waxba sixiixin kahor, oo wuxuu kuu sharaxaa sida aad ku bixin karto lacagahaas
- Haddii aadan qareenkaaga awoodin, isaga ama iyada waa inay kuu gudbiyaan hay'adaha sharciga ama qareenada bilaashka ah ku shaqeeya

## SIDEE BAAN DALKA MAREYKANKA SI SHARCI AH UGU JOOGI KARAA?

Waxaad si sharci ugu joogi kartaa dalka Mareykanka keliya hadduu xaakimka laanta socdaalka ama saraakiisha laanta socdaalka ay ku siiyan fasax. Xaakimka laanta socdaalka ama saaraakiisha laanta socdaalka waxay baran doonaan kiiskaaga si ay uga go'aan gaaraan inaa u qalanto helida badbaadada laanta socdaalka.

Shuruucda laanta socdaalka dalka Mareykanka way adag yihiin. Waa muhii inaad la hadasho qareenka laanta socdaalka oo kaala talin kara waxyaabo ku saabsan haddii aad u qalanto ama aadan u qalmin inaad codsato fasaxa ah inaad si sharci ah ugu nagaado dalka Mareykanka. Keliya xaakimka ama saraakiisha laanta socdaalka ayaa go'aan ka gaari karta inaad joogto. Qareenku waxa uu kaa caawinayaa inuu u sharaxo xaakimka laanta socdaalka iyo saraakiisha laanta socdaalka sababta uu/ay isagu/iyadu uusan kuugu ogolaado inaad joogto, wuxuuna kaa caawin karaa inuu tusiyo xaakimka ama saraakiisha ee shuruucda laanta socdaalka ay kuu ogolaanayso inaad halkan si sharci ah ugu nagaado.

Markaad la hadleyso qareen, waxyaabahani waa qaar ka mid ah uu isagu ama iyadu uu/ay doonayo/so inay ogaato inuu/ay go'aan ka gaaro/to inaad halkan si sharci ah ugu nagaadi karto:

### HADDII AAD KA BAQEYSO INAAD KU LAABATO DALKAAGA HOOYO

Haddii aad ka baqeyso inaad ku laanato dalkaaga hooyowaayo waxaad moodi kartaa in qof ku waxyeeleyn karo, u sheeg qareenkaaga oo laga yaabo inuu warsado xaamkimka inuu kuu ogolaado inaad halkan joogto. Fasax gaarka ah waxaa loogu yeedhaa magangelyo. Magangelyada waxaa lagu heli karaa haddii dadka wadankaaga jooga ay ku dhibaateynayaan ama kuugu hanjabayaan inay ku dhibaateeyaan waayo sababtoo ah: adiga ama xubin qoyskaaga ka mid ah ayaa siyaasad ku shaqo leh, talaabooyin siyaasadeed ku lug leh, ama iiamaankaaga, diintaada, jisigaaga ama luuqada aad ku hadasho, ama sababtoo ah waxaad ka dhalatay koox gaar ee beesha ka mid; ama doorbidaad jisigaaga nin ama naagnimo; nooca jinsigaaga, such gabar ahaansho; diidmadaada inaad askari noqoto ama aad ku biirto mooryaan.

**HADDII WAALIDIINTAADA AY KUGU  
DHAAWACAYEEN AMA KUGU DEYRIYEEN AMA  
HADDII AY WAALIDIINTAADA AH GEERIYOODEEN**

Haddii ay waalidiintaada ay kugu dhaawacayaan, haddii aadan garaneyn halka ay ku sugan yihiin, ama waalidiintaada ay geeriyoodeen, waxad awood u yeelan kartaa inaad fasax weydiisato aad ku joogto dalka Mareykanka. Fasaxan waxaa loogu yeedhaa Heerka Dhalinyarada Muhajiriinta Gaarka ah, ama SIJS. Xaaladaha qaarkood, waa inaad ka yartahay 18 sano jir si aad SIJS ugu dalbato.

Haddii mid kamid ah amaba labadaada waalid ay ku garaacaan, ayna kugu qasbaan inaad shaqeysa saacadooyin badan ama ay kuu diidaan inay ku quudiyaan, waxaad u sheegi kartaa qareenkaaga. Wuxaan kalood awood u yeelan kartaa inaad warsato fasax gaar ah oo aad ku joogto dalka Mareykanka oo hoos imaanaya Falalaka Shaqaqooyinka ee Ka dhanka ah Haweenka (VAWA), Balse waxaa muhiim ah in qareenkaaga iyo xaakimkuba ogaadaan inaadku amaan heleyn dalkaaga.

**HADDII LAGUUGU QASBO INAAD AMA LAGUUGU  
QAYAANO IMAASHAHA DALKA MAREYKANKA AMA  
LAGUUGU QASBO INAAD SHAQEYSO MAR HADDAAD  
TIMAADO DALKA MAREYKANKA**

Wuxaan fasax ku warsan kartaa inaad halkan si sharci ah ku joogto haddii laguugu soo qasbay inaad timaado dalka Mareykanka ama laguugu soo khayaanay halkan imashaheeda, kadibna laguugu soo qasbay inaad sameyso wax aadan dooneyn, sida shaqeysta saacadooyin badan oo waxyar lagu siinayo amaba aan lagu siineyn. Eray-bixinta fasaxa gaarka ah ee joogista waa Dal-ku-galka T.

**HADDII AAD AHEYD DHIBANE DENBIYADA QAAR  
EE LAGU GALO DALKA MAREYKANKA EE AAD ULA  
SHAQEYSAY BOOLISKA**

Hadduu qof kuu geystay dhaawac ama qof kugu dhwo la dhaawacay oo qof u wacay booliska arintan darteed, waxaad awood u yeelan kartaa inaad fasax weydiisato joogista dalka Mareykanka haddaad booliska ka caawiso arimaha qar (sida ka jawaabista su'aalahooda). Eray-bixinta fasaxa gaarka ah ee joogista waa Dal-ku-galka U.

**HADDII AAD DALKA MAREYKANKA KU NOOLEYD  
MUDO DHEER OO XUBNAHA QOYSKAAGA AY  
HEESTAAN DARAJO SHARCI AH**

Xitaa, haddii hooyadaada ama aabbahaaga uu si sharci ah ugu noolyihin dalka Mareykanka, dawlada ayaa isaga ama iyada warsaneysa inay kuu ogolaadaan inaad si joogto ah ayaga kugula noolaato halkan. Tani iskama dhici karto. Wuxaan ku laaban kartaa dalkaaga hooyo in xoogaa ah ilaa dawlada ay fasax kaa siiso inaad ku laabato dalka Mareykanka. Haddii aad walaal wiil ama gabadh ah ku leedahay dalka Mareykanka oo sharci ah ugu nool, isaga ama iyada ayaa waxay awoodi karaan inay si fiican kuu caawiyaan.

Haddii aad ka baeysa inaad dalkaaga hooyo ku laabato, waxaa muhiim ah inaad runta u sheegto qareenkaaga sidaa darteed isaga ama iyada ayaa waxay isku dayi karaan inay kaa caawiyaan inaad joogto dalka Mareykanka. Mararka qaar way kaa walaac gelin karaan inaad wax ka hadasho, basle waa muhiim inaad qareenkaaga iyo xaakimka ay ogaadaan inaadku amaan heleyn dalkaaga hooyo.



## **BAL KA WARAN HADDII UU XAAKIMKU YIRAAHDO MA JOOGI KARO DALKA MAREYKANKA?**

